

Soo sheegida

Dembiga



1. Waa maxay Dembi joojiyayaashu sideese u shaqeeyaan?

Dembi joojiyayaashu waxay heshiis la yihiin booliiska Fiktooriya iyo ururada ku salaysan bulshada kuwaas oo aaminsan in shicibka guud caawimi karaan xalinta dembiga. Dadku waxay caawimi karaan iyadoo ula qaybsanaya macluumaad si qarsoodi ah. Dembiya la soo xulay oo aan weli la hellin ayaa waxaa shaacisa warbaahinta, iyadoo shacabka laga codsanayo inay qayb ka qaataan. Dadka waxaa lagu dhiirigeliyaa inay soo gudbiyaan faahfaahinta nooc kasta oo dembi leh.

2. Goorma ayaa dembi joojiyayaashu shaqadooda bilaabeen?

Dembi joojiyayaasha waxaa laga asaasay 1987 Fiktooriya gudaheeda, iyadoo ku salaysan nadaam ka shaqeeyay New Mexico, dhulka Maraykanka. Waxaa qaban kara dhamaan dadka Fiktooriya ku nool oo xiisaynaya caawimida ilaalinta bulshada.

3. Goorma ayaa la wacaa dembi joojiyayaasha?

Haddii dembigu markaas socdo waxaa fiican inaad wacdo khadka (000) ama nambarka booliiska kuugu dhow. Haddii macluumaadku la xiriiro dembi horay loo galay, wac dembi joojiyayaasha tel: 1800 333 000. Nambarkaan waa in isagana loo isticmaalaa in lagu soo sheego macluumaad marka la ogaado dembi markaas la abaabulayo, ama soo gudbinta warbixinta meel daarrogo lagu beero ama lagu kala gato.

Haddii aad u baahan tahay caawimo turjubaan, telefoon u dir Adeega Afcelinta iyo Tarjumida Qoraalka 131 450 weydiisana in lagugu xiro Dembi Joojiyayaasha Fiktooriya.

4. Sidee xarunta dembi joojiyayaashu u shaqaysaa?

Shaqaaale la tababray ayaa ka shaqeeya xarunta waxayna qaadaan warbixinta. Macluumaadkaas ayaa loo gudbiyaa qaybta ku haboon ee booliiska Dawlad Goboleedka Fiktooriya si ay u ogaadaan una baaraan. Aqoonsiga qofka soo wacayaa macne samayn mayo umana baahna in la carab baabo. Faahfaahinta ayaa muhiima. Mabaadiida nadaamkaan ayaa waxay tahay in aan la aqoonsan qofka soo wacaya.



5. Ma la raadraaci karaa qofka soo wacay?

Maya. Qalabka telefoonadu ma muujiyo nambarka soo wacaha, dembijoojiyayaashuna ma diiwaangeliyaan qofka soo wacay. In aan la aqoon soo wacaha waa wax run ah.

Soo sheegida dembiga

6. Wax suurtagal ah mayaa in la ogaado in wicitaanku wax taray?

Dadka soo waca waxaa la siiyaa nambor qarsoodi ah marka ugu horaysa oo ay soo wacaan. Soo wacayaashu way soo wici karaan mar labaad iyagoo wacaya 1800 333 000 afar ilaa shan asbuuc ka dib. Dabcan dembi joojiyayaashu dib uma soo wici karaan telefoonka soo wacaha.

7. Waa maxay faaiidadu?

Waxtarka ay leedahay waa ku qanacsanaanta caawimida bulshada iyadoo qayb laga qaadanayo sharciga iyo kala-damaynta dadweynaha iyo amankooda. Xariga iman kara iyo ka qabashada qofkaas ummadda waxay keenaysaa in la iska dhax saaro dembiilayaasha. Bulshada ku firfircoon xagga ilaalinta amnigeeda waxay ka hortegi kartaa qof dembi geli lahaa.

Badbaadinta waqtiga iyo lacagta lagu bixinayo baaritaanka lama soo koobi karo faaiido badan ayeyna u leedahay qof walba.

8. Wax dheef ah?

Haddii cid la xiro macluumaadka la bixiyey dartiis waxaa laga yaabaa in booliisku u soo jeediyaan Guddiga Dembijoojiyayaasha Fiktooriya in la siiyo soo wacaha abaalgud dhan \$1000. Iyadoo ku xiran hadba dembigu inta uu le'eg yahay. Abaalgudkaas waxaa lagu bixin karaa si qarsoodi ah haddii soo wacuhu sii wado la xiriirida isagoo tixraacaya nambarkii qarsoodiga ahaa.

9. Dembi joojiyayaashu (Crime Stoppers) ma ku guulaysanayaan hawshooda?

Laga soo bilaabo 1997 waxaa jiray 425, 000 oo telefoon oo la soo diray kuwaas oo keenay 7,500 oo qabasho ah iyo in ka

badan 32,800 dacwo oo la soo oogay. Daroogo qiimaheedu dhan yahay \$76milyan ayaa la qabtay in ka badan \$22milyan alaab qiimiheedu dhan yahay oo la xadayna waa la hellay.

10. Soo sheegid la'aantu ma waanay wadaninimo xuma ahayn?

Caadooyinka dhamaantood maaha kuwa maan gal ah. Waa jirtaa in carruurtaada laga waaniyo inay kuu sheegaan sheekooyinka khiyaaliga ah meelaha lagu cayaaro. Waase wax kale in la qariyo ama aan la sheegin macluumaad dembi oo muhiima marka amniga bulshadu khatar ku jirto. Haddii noloshu iyo hantida ay khatar geliyaan dembiilayaal aan la ogeyn. Waxba kuma jabna in la soo sheego. Gudbinta macluumaadku waa fal masuuliyadeed ay tahay in qofka masuulka ahi sameeyo si bulshada loo badbaadiyo. Sheegida aan la sheegin macluumaad dembiyeedku waa wadaninimo xumo.



www.vic.crimestoppers.com.au

“Joojinta dembiilayaasha’ waa hawl wadaaga lala qaybsanayo bulshada, warbaahinta iyo booliiska oo dhamaan u wada shaqaynaya wadajir si loo caawimo xalinta dembiga ka dhaca dhamaan Gobolka.

In ka badan 15 sanadood ayay dembi joojiyayaashu ka caawimayeen Booliiska Fiktooriya in la qabto dembiilayaasha.

Mid ka mid ah Faaiidooyin ak ugu badan oo dembi joojiyayaasu waa in dadku bixin karaan mascluumaad isla markaana aan la aqoon iyaga”.

Christine Nixon
Madaxa Booliiska Fiktooriya

Waxaa lagu daabacay caawimiada laga hellay kaalmada Bulshada ee Dawlada Fiktooriya iyo Motorola.



Somali